

Raadinta Dadka la joogay qofka qaba COVID-19

Maxay i waydiin doonaan?

Waxaa la iga helay COVID-19

1. Sheeg magacaaga, meesha aad degan tahay, taariikhda dhalashada, iyo isirka/qoomiyada.
2. Xagee iyo goormee ayaad isleedahay waad la joogtay qofka qaba COVID-19?
3. Xagee ayaad aaday marka aad cudurka faafin kartay?
4. Fadlan sheeg magacyada iyo meelaha lagala xariiraayo dadka aad la joogtay dhawaanahaan.



Waxaa la joogay qof laga helay COVID-19

1. Sheeg magacaaga, meesha aad degan tahay, taariikhda dhalashada, iyo isirka/qoomiyada.
2. Ma qabtaa astaamaha COVID-19?



Waraystuhu **KUMA**

- Waydiinaayo aqoonsigaaga socdaalka.
- Kuma waydiinaayo nambarkaaga Social Security.
- Kuma waydiinaayo xogta dhaqaalaha.
- Kuuma sheegaayo dadka laga yaabo inay ku qaadsiiyeen COVID-19.

Marka waraysigu dhammaado, waraystaha ayaa kugu xiraaya ilaha xogta kuna siinaaya macluumaadka ku saabsan waxa xiga ee aad samaynayso.

Ogsoonow: Ka qaybgalkaagu waa ikhtiyaari. Dhammaan xogta aad bixiso waa mid qarsoodi ah xogtaada caafimaadkana waxaa difaacaaya sharciga. Turjumaano ayaa diyaar ah.

Booqo [DOH.WA.GOV/Coronavirus](https://www.doh.wa.gov/Coronavirus) si aad u hesho xog dheeraad ah. Si aad dukumiintigaan oo qaab kale u ah u dalbato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimeel udir civil.rights@doh.wa.gov



DOH 820-092 August 2020 Somali